F:40

GOLAHA WAKIILADA JSL

KU: Shirgudoonka Golaha Wakiilada =hargeysa

OG: Dhamaan Xubnaha Golaha Wakiilada

Ujeedo: **<u>Mooshin ku saabsan Kaabis iyo waxka bedelka 2^{aad} ee xeer LR. 14/2011</u>**

Anaga oo ah mudanayaasha magacyadoodu hoos ku saxeexanyihiin waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa mooshinka xaga hoose ku cad kaas oo ku saabsan waxkabedel iyo kaabis 2aad ee Xeer No 14/2011

- Mudanayaashu waxay wax ka bedel iyo dib u habayn ku sameeyeen xeerkan kaas oo qodobo kamida isku hagaajiyeen qaar cusubna kusoo dareen, waxaa xusid mudan in habraacii qodobada ee xeerkii hore uu is bedelayo laga bilaabo Qodobka 4aad sidaa mudanayaashu hawla socdaan.
- Mudanayaashu waxay madoobeeyeen (**bold**) hoostana ka xariiqeen (**underlined**) dhamaan qodobada iyo farqadaha ay wax ka bedelka ku sameeyen.

QODOBADA KAABISTA IYO WAXKA BEDELKA LAGU SAMEEYEY

Qodobka 3aad farqadiisa 1aad waxay mudanayaashu ku soo dareen xaraf **t** ah una qoran sidan

1. Dalka JSL wuxuu yeelanayaa Guddi guud oo madax-banaan, una xilsaaran:-

    t. ku ilaalinta ururada/xisbiyada dhexdooda ku dhaqanka dimuqraadiyada, xeerkan, iyo shuruucda kale ee dalka.

isla farqada 6aad ee **Qodobka** 3aad oo odhanaysey Guddidu waxay xilka haynayaan muddo 2 sano ah waxaa loo bedeley:-

6. **Guddidu waxay xilka haynayaan muddo (5) shan sano ah oo ka bilaabanta maalinta ay Maxakamada Sare xilka u dhaariso, madaxweynuhuna waa u cusboonaysiin karaa**

16.10.2011

Waxay mudanayaashu xeerka kusoo dareen qodob cusub oo ah **Qodob 4aad** una dhigan sidan kaas oo ka hadlaaya xilka qaadista Guddida.

Qodobka 4aad

Xilka qaadista Guddida Diiwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka.

b. xubnaha guddida waxaa xilka lagaga qaadi karaa habka loo maro xilka qaadista komishanka doorashooyinka Qaranka

t. hadii ay dhacdo mudadii xilka gudida oo aan dhamaan ay isku mar xubnaha guddidu baneeyaan jagooyinkoodii, guddida cusub ee la magaacaabaa waxay dhamaystirayaan mudadii xilka ka hadhsanayd

Waxaa farqada **3aad** ee **Qodobka 5aad ee** (Codsashada Diiwaangelinta iyo Qabashada Araajida) lagusoo daray xaraf cusub oo (**d**) ah kaas oo dhigaaya:-

d. waxaa waajib ah in lacagta cashuurtu cadahay in la wadaagey oo aysan ka bixin gacan qudha, waxaana dabagal ku samaynaya Guddida Diiwaan-gelinta.

Waxay mudanayaashu kaabis ku sameeyeen isla **Qodobka 5aad** ee(Codsashada Diiwaangelinta iyo Qabashada Araajida) xarafkiisa (**s**) kaasoo u dhigan :-

s. mudadda liisanka ee xisbi qaran waa toban (10) sano oo ka bilaabanta taariikhda liisanka la siiyay.**hadiise uu lumiyo xisbigu ama urur shardi kamid ah shuruudihii ruqsada lagu siiyey waa lagala noqonayaa ruqsada, marka guddida diiwaan-gelintu cadayn sugan u helaan in uu jabay shardi ka mid ah shuruudihii ruqsada lagu siiyey.**

Waxay mudanayaashu kaabis ku sameeyeen **Qodobka 6aad** ee(Xisbiyadda Qaran iyo Ururada ku Meel-gaadh ka ah) farqadiisa **9aad** waxaanay kusoo kordhiyeen inta madaw ee (bold) ka ah.

9. Urur siyaasadeedka loo ansixiyo xisbi, kuma biiri karo Xisbi kale doorashooyinka ka hor iyo kadib, sidoo kale waa iney xeerkiisa ku caddaataa inaan laga saari karin/eryi karin xisbiga xubin ama xubno loo doortey Golayaasha sharciga ah hadii aanay ka hor imanayn xeerar ka dalka iyo xeerka xisbiga **ama aanay xubintu/xubnuhu iskood uga tanaasulin xubinimada xisbiga.**

Waxaa xeerka lagu soo daray qodob cusub oo ah **Qodobka 19aad** waxaanuu u qoranyahay

Qodobka 19aad

Khilaafaadka ka Dhasha Xisbi/Urur Dhexdii ama Laba Urur/Xisbi

1. Haddii xubnaha xisbi ama urur isku khilaafaan hogaanka ama u kala jabaan laba meelood iyo wax ka badan , hay,adaha xisbigu/ururkuna xalin kari waayaan khilaafka, waxa dhinicii danaynayaa dacwad u gubinayaa gudiga diwaan gelinta Axsaabta iyo Ururada siyaasada.
2. Gudiga diiwaan gelintu markuu helo dacwadda ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan; wuxuu ka soo saarayaa go,aan ku salaysan xeerka nidaamka ururada iyo axsaabta siyaasadeed ee xeer lam.14 iyo dastuurka xisbiga/ ururka hogaankiisa laysku haysto ee laga diiwaan geliyey gudiga diiwaan gelinta.
3. Dhinicii ku qanci waaya go,aanka gudiga diiwaan gelinta waxaa u bannaan in uu racfaan u qaato Maxkamadda Dastuuriga ah , xukunkeeduna wuxuu noqonayaa kama dambays.
4. Haddii dhinacyada is hayaa la yimaadaan laba dastuur oo is khilaafsan oo loo sameeyey ururka/ xisbiga hogaankiisa laysku haysto , waxaa la tixgelinayaa dastuurka laga diiwaan geliyey gudiga diiwaan gelinta ee lagu aqoonsaday ururka/ xisbiga .
5. Haddii khilaafka farqadaha hore ku qorani yimaado inta aan ururka la diiwaan gelin ee aan aqoonsiga la siin, gudiga diiwaan gelintu ma diiwaan gelinayso magaca ururka hogaankiisa laysku khilaafay
6. . Dhinacyadana waxaa u banaan in mid waliba gaarkiisa u samaysto urur kale oo aan la hayn magacii laysku qabsaday.
7. Haddii laba urur ama urur iyo xisbi isku qabsadaan magaca ama astaanta diiwaan-gelinta ka dib, waxaa loo aqoonsanayaa in uu leeyahay magacaas ama astaantaas kan gudigu u diiwaan gelisey ama loo hor diiwaan geliyey.

Waxaa farqad **2aad** lagusoo daray **Qodobka 23aad** (xisaab xidhka) ee xeerkan waxaanay u dhigantahay sidan:-

2. Hanti dhawraha madaxa banaan waxaa codsanaya hawlgalkiisa komishanka Dooroshooyinka Qaranka ama gudida diiwaangleinta Ururada.

Mudanayaashu waxay meesha kasaareen **Qodobka 26aad** farqadiisa **7aad** kaasoo odhanaayey:-

8. Marka mudo xileedka Guddida Diwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka uu dhamaado waxaa shaqadooda la wareegaya komishanka doorashooyinka Qaranka.

Maadaama oo mudadii gudidu xilka haynaysey loo bedeley 5 sano.

Isniin

Doodda

Wax-ka-beddel iyo Kaabis
Xeerka Nidaamka Uraada
Iyo Axsaabta Siyaasadda XLr. 14/2011

✓1. Max'd Xuseen X. Cise
✓2. Axmad Barkhad Obsiiye
✓3. Cqadir Ismaciil
✓4. Xuseen Ismaciil
✓5. Adan Xaji Diiriye
X 6. Maxamed ~~Xuseen~~ ~~Xaj~~ Yusuf
✓7. Farxan Max'd Cali
X 8. Jamac Xasan Adan
X 9. Axmed Ibrahim Dalir
X 10. Xasan Cawale Caynan
X 11. CALI Maxamed Adan
X 12. Ibrahim Mahdi Bubaa
✓13. Cali Yusuf Axmed
X 14. Tukale
✓15. Maxamud Axd Obsiiye
X 16. Max'd Farax Qabille
✓17. Ibrahim Axmed Raygal
✓18. Maxamed Saalax Cige
~~19. Xasan Cawale Caynaan~~
X 19 Baar Siciid
✓20. Xaashi Xuseen Qaabil
✓21. Axmed Ducale Bullale
22. Adan Tarabi ogle

Saxeexa Mudanayaasha.

Mooshin Kaabis ka Soobaxan Kaabis iyo Guxkabedd

2000 e Xeer 4.14

1. Saed Elmi Rahhl
2. Ibrahim Mahdi baabaa
3. Jaamac Xasan Aden
4. Maxamed Xuseen X. Cise
5. Siciid Maxamed Cilmi
6. Saleban Cawad Celi
7. Abdulkadir H Ismail Jirde
8. Abdi Mohamed Jama
9. Cali Xaaji Moxamed
10. Mohis Bakkin Migane
11. A. H. Aden Ahmed Hassan Aden
12. Maxamed Faarax Qabile
13. Cali Maxad Aadan
14. Hussein Ismail Jusuf
15. Ibrahim Cowale Cabdi
16. M J. DABLE
17. Saeid Oortan Cismaan